

**Xeerka Maamulka 12 November 1957, lamba. 176 rep**

**Tala soo jeedinta Guddiga Farsamada- la-talinta arrimaha ku saabsan dhoofinta badeecadaha “shatiga leh”.**

#### **MAAMULAHA**

Marka uu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. 1 “ Dhismaha Xukumadda Soomaaliya;

Marka uu arkay dekeretda 18 Maajo 1956, lamba. 78, “Xeerka Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya”

Marka uu arkay qodobada 5 iyo 39 ee Xeerka 8 Disember 1957, lamba. 15 “Xeeka Nidaamka Wax Is-waydaarsiga ganacsiga Dibadda iyo arrimaha lacagaha”

Marka uu garowsaday baahida loo qabo nidaaminta qorshaha bixinta shatiga dhoofinta badeecadaha aan lagu xusun lifaaqaqa C) ee xeerka 8 Disember 1956, lamba. 15 oo ku xiran talada Guddiga farsamada-la-talinta ee gaarka;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada fadhigiisa 23 Oktobar 1957;

Tala soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha;

Wuxuu dekereetu ku soo saarayaa:

#### **Qodobka Qura**

Dhoofka badeecadaha aan laoga baaraandegin shaxda C) ee ku lifaaqan xeerka 8 Disember 1956, lamba. 15, wuxuu ku xirnaan doonaa qorshaha shatiga ay bixiso Wasaaradda Arrimaha Maaliyadda:

- Waaxda Ganacsiga Gudaha, Dibadda iyo lacagaha – kadib markii ay ku soo taliyaan Guddiga farsama-la-talinta ee ku xusan qod. 3 ee xeerka la soo sheegay, kaasoo ka kooban sida soo socota:
- Madaxa Waaxda Ganacsiga Gudaha, Dibadda iyo lacagaha – Guddoomiye;
- Agaasimaha Faraca Bangiga Itaalida oo xilkiisu uu yahay maamulidda Maareynta Xisaabta Lacagaha,
- Madaxa Qaybta Lacagat Waaxda Ganacsiga Gudaha, **Dibadda** iyo Lacagaha;
- Madaxa Qaybta Dhoofka iyo Soo dejinta ee Waaxda la soo sheegay;
- Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Canshuuraha;
- Agaasimaha Adeegyada Kastamada Soomaaliya.

Muqdisho, 12 Disember 1957.

P. Maamulaha

**P. Franca**

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

**Xaaji Faarax Cali Cumar**

Waa la hubiyay lana diwaangeliyay - Diw. lamba. 5 - bogga 250.

Muqdisho, 16 Disember 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**